

Autism Spectrum Disorder (Astaamaha Badan ee Arbushka Autismka)

Sidoo kale loo yaqaan: ASD, Pervasive developmental disorder (PDD) ama (Cilladaha Arbushka Koritaanka Ragay)



Autism Spectrum Disorder(ASD) waa xaalad niyuroon iyo koboceed taasi oo bilaabanta carruurnimada hore oo jirta inta qofku nool yahay.

Waxay saamaysaa sida qofku uu u dhaqmo, uu ula macaamilo, uu ula xidhiidho, kuna barto dadka kale. Waxaana kamid ah waxa loo yaqaan xaaladda Asperger iyo xaaladaha koboceed ee joogtada ah.

Waxa loo yaqaan xaaladda "spectrum" sababtoo ah dadka qaba ASD waxay yeelan karaan astaamo badan.

Dadka qaba ASD waxay ku dhibaatoon karaan inay kula hadlaan, ama waxa dhici karta inayna indhahaaga soo eegin marka aad la hadlayso.



Waxa dhici karta sidoo kale inay leeyihiin danayno xaddidan iyo habdhaqano

soo noqnoqda. Waxa dhici karta inay wakhti badan ku qaataan nidaaminta shayada, ama waxa dhici karta inay soo celceliyaan hadallo isku mid ah.

Waxa dhici karta sida badan inay u muuqdaan inay "muudh" iskaga jiraan.

Marka la joogo meel caafimaadka ilmaha lagu baarayo, bixiyaha daryeelka caafimaad waa inuu hubiyaa koboca ilmahaaga. Haddii ay jiraan calaamado ASD, ilmahaagu wuxuu mari doonaa qiimayn ballaadhan.

Qiimayntu waxa dhici karta inay ku jiraan koox khabiirro ah, oo samaynaya baadhitaano iyo qiimayno kala duwan si ay u ogaadaan xanuunka.

Waxa keena ASD lama yaqaan. Cilmi-baaris ayaa soojeedisay in hidde-sidayaasha iyo bey'addu ay door wayn ku leeyihiin.

Ma jiro hadda daawayn istaandar ah oo loo hayo ASD. Waxaa jira habab badan oo lagu kordhin karo awooda ilmahaaga ee inuu koro oo u barto xirfado cusub.

Ku bilaabista xilli hore waxay horseedi kartaa natiijooyin fiican.



Daawaynaha waxa kujira daawayno habdhaqan iyo xidhiidh, tabobarro xirfadeed, iyo daawooyin si loo xakameeyo astaamaha.

Text is public domain from the MedlinePlus Health Topics Introductions series. This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>

A Healthy Roads Media project

www.healthyroadsmedia.org

Autism Spectrum Disorder – Somali Last Reviewed 2015